
CUTUB 6: URURKA CERT

Cutubka dhexdiisa waxaad ku baran doontaa:

- **Ururka CERT:** Sida loo abaabulo oo loo hawlgeliyo adeegyada iyo shaqaalaha mutaddawiciinta ah iyadoo loo hoggaansan yahay mabaadii'da ururka CERT.
 - **Nabdoonaanta Samatabbixiyaha:** Sida loo dhawro nabdoonaantaada iyo tan saaxiibkaa inta lagu jiro goobidda iyo amatabbixinta.
 - **Diiwaaninta:** Tabaha loo diiwaaniyo meesha ay marayso xaaladda iyo sahayda la haysto.
 - **Abaabulidda Kooxda:** Layli miiska korkiisa ah ayaa fursad kuu siin doona sidaad u dabbakhi lahayd aqoonta aad u leedahay abaabulidda kooxda. Cutub 6 Ururka CERT
-

HIMILOOYINKA	Dhamaadka cutubkan, ka qaybqaatayaashu waa inay karaan in ay: <ul style="list-style-type: none">▪ Sharaxaad ka bixiyaan ururka CERT.▪ Aqoonsadaan xiriirka ka dhexeeya CERT iyo ICS.▪ Faahfaahiyaan shuruudaha diiwaaninta ee CERT.
WAJAHADDA	Wajahadda cutubkani waxay ka koobnaan doontaa: <ul style="list-style-type: none">▪ Soo dhaweyn iyo Arar.▪ Ururka CERT▪ Go'aan qaadashada CERT.▪ Diiwaangelinta.▪ Layli: Hawlqabadka ICS.▪ Layli fadhi-ku-qabasho ah.▪ Gebagebada Cutubka.
WAQTIGA LAGU QIYAASAY IN LAGU DHAMEEYO	1 saac 45 daqiiqo
DARIIQOYINKA TABABBARKA	<p>Baraha hoggaanka ah ayaa xisaddan ku billaabaya in uu ka qaybgalayaasha ku soo dhaweeyo Cutub 6: Dhismaha Kooxda CERT, waxaanu dadka bari doonaa macallimiinta xisadda. Dabdeed baruhu wuxuu bixinayaa guudmar kooban oo ku saabsan xisaddan</p> <p>Dabadeed, baruhu wuxuu sheegayaa ra'yiga ururka CERT—himilooyinkiisa, taariikhdiisa, iyo dabeecadihiisaba—iyo sida ay dedaallada CERT ugu biiraan Habka Taliska Dhacdada ee guud (ICS).</p> <p>Dabadeed, baruhu wuxuu dulmari sida ay CERT isu abaabusho xaaladda musiibada marki lagu jiro. Baruhu wuxuu sheegi go'aan qaadashada CERT isagoo carrabka ku adkaynaya walaaca koowaad ee nabdoonaanta samatabbixiyaha. Wadahadalkan waxaa ku jiri doona sida tabaga CERT ay u saameeyaan darraanta burburka dhisme ku dhacay.</p> <p>Ka dib, baruhu wuxuu qeexi shuruudaha diiwaannada CERT. Muhiimadda waxay saarraanaysaa muhiimadda diiwaangelinta CERT. Baruhu wuxuu soo bandhigayaa qaar ka mid ah foomamka CERT yadu ay u isticmaali karaan in ay qoraan xogaha noocyadooda kala duwan.</p> <p>Dabadeed, baruhu wuxuu qayban hawl kooban oo ah waqtiga ay ka qaybgalayaashu u dhigmayaan doorarka shanta ah ee ICS oo ay ku jiraan xaaladaha iman kara markay CERT yadu hawlgalaan.</p> <p>Ka dib markii qoraallada oo dhan la soo bandhigo lagana wadahadlo, ka qaybgalayaashu waxay ka qaybqaadan doonaan layli miiska dushiisa ah oo khibrad ka siin doona qorshaynta iyo tabaha CERT. Qorshaha lagu hagaajiyo layligaa miiska dushiisa ayaa wuxuu ka dhigmi doonaa salka loo cuskado layli-buuxa oo ay kooxuhu ka qaybqaadan doonaan inta lagu jiro xisadda ugu dambaysa.</p>

**WAXYAABAHA LOO
BAAHAN YAHAY**

- *Tilmaanta Macallinka ee Kooxda Kajawaabidda Xaaladda Degdegga ah ee Bulshada*
- *Buugga Ardayga ee Kooxda Kajawaabidda Xaaladda Degdegga ah ee Bulshada*
- *Muuqaallada 6.1 ilaa 6.8*

QALAB

Qalabka soo socda ee dheeraadka ah ayaa loo raba cutubkan:

- Kombiyuutar leh barnaamijka PowerPoint
- Kombiyuutar borojektar leh ama shaashad weyn

OGEYSIINNO

Qorshe waqtiyeedka loo gartay cutubkani waa sida soo socota:

Arar iyo Guudmarka Cutubka.....	5 daqiiqo
Ururka [Dhismaha] CERT	20 daqiiqo
Go'aan qaadashada CERT	10 daqiiqo
Diiwaanin	10 daqiiqo
Hawl: Doorarka ICS Functions	10 daqiiqo
Layli Miis	45 daqiiqo
Gebagebada Cutubka	5 daqiiqo

Wadarta Waqtiga: 1 saac 45 daqiiqo

CUTUB 6 URURKA CERT



**GUUD MAR
CUTUBKA**



MUUQAAL 6.1

SOO DHAWEYN IYO ARARTA CUTUBKA

Ku soo dhawee ka qaybgalayaasha Cutubka 6 ee barnaamijka tababbarka CERT.

Dadka bar barayaasha cutubkan oo weydiiso barayaasha cusub in ay si kooban u qeexaan khibraddooda dhismaha ururka CERT.

Ururka CERT

- Sharaxaad ka bixi ururka CERT.
- Aqoonso xiriirka ka dhexeeya CERT iyo ICS.
- Faahfaahi shuruudaha diiwaaninta ee CERT.

Muuqaal 6.1

Xusuusi ka qaybgalayaasha in cutubyadii horreeyey, ay ku barten tabo khaas ah iyo waajibaadyo ay isticmaalaan marar cayiman. U sheeg in cutubkan, ay isticmaali doonaan aqoontaas iyagoo koox la shaqaynaya oo asaas ahaanna ururka CERT u isticmaalaya.

HIMILOOYINKA

U sheeg ka qaybgalayasha in dhamaadka cutubkan, waxay awoodi doonaan in ay:

- Sharaxaad ka bixiyaan ururka CERT.
- Aqoonsadaan xiriirka ka dhexeeya CERT iyo ICS.
- Faahfaahiyaan shuruudaha diiwaaninta ee CERT.



**XUSUUSINTA
MACALLINKA**

**Weydii haddii uu qofna su'aal ka qabo
mawduucyada lagu dabooli doono cutubkan.**



SOO JEEDI
MAWDUUCA



MUUQAAL 6.2

URURKA CERT

Ujeeddada Maaraynta Kobta ay Wax ka Dheceen

- Joogteeynta nabdoonaanta shaqaalaha musiibada
- Bixinta hoggaamin cad iyo qaab dhismeed urur.
- Hagaajinta waxgalnimada dedaalka samatabbixinta

Muuqaal 6.2

U sharax ka qaybgalayaasha in Maarayn Gurmada oo kobta ay wax ka dhaceen ahi in loogu baahan yahay in la:

- Joogteeyo nabdoonaanta shaqaalaha musiibada. Taliyayaasha Dhacdooyinka CERT wa in ay mar kasta kala hor mariyaan hawlaha wax qabadka iyagoo ku salaynaya awoodda iyo tababbarka kooxda iyo weliba mabda'a ah in nabdoonaanta samatabbixiyuhu ay tahay muhiimadda koowaad. Hoggaanka hawsha ee CERT ayaa hawlaha iyo meelaha u qoondeeya xubnaha kooxda. Xubnaha kooxda CERT waxay u wada shaqeeyaan hab wehelsi ah waxayna u hawlgalaan si ku aaddan qiimayntii xaaladda ay la kulmeen.
- Bixiyo hoggaamin cad iyo qaab dhismeed urur iyadoo la samaynayo jaranjarada amarka iyo doorar ay og yihiin dhamaan xubnaha kooxda. Xubin kasta oo CERT ahi waxay leedahay hal qof oo keliya oo ay amarka ka qaadato una hoggaansanto.
- Hagaajiyo waxgalnimada dedaalka samatabbixinta. Xogta musiibada waxaa la ururiyaa waxqabadkana la kala hor mariyaa iyadoo lagu salaynayo nabdoonaanta samatabbixiyaha iyo samaynta wanaagga ugu badan oo loo sameeyo tirada dadeed ee ugu badan iyadoo la eegayo awoodda iyo tababbarka ay leedahay kooxda.



XUSUUSINTA
MACALLINKA

URURKA CERT (WELI SOCDA)

Tilmaan in ururka CERT uu ku salaysan yahay Habka Taliska Dhacdada (ICS), oo ah hab maarayneed oo la tijaabshay oo ay isticmaalaan inta badan dabdemisyada iyo kooxaha maaddooyinka halista ah ka shaqeeya.



MUUQAAL 6.3

BAAHIDA LOO QABO URURKA CERT

Baahida loo Qabo Ururka CERT

Wuxuu bixiyaa:

- Eray bixinno la isla yaqaan oo wax ka geysta war-is-gaarsin micno leh iyo faham la wadaago.
- Wada xiriir wanaagsan oo ka dhexeeya xubnaha kooxda.
- Qaab maarayneed ee si wanaagsan u qeexan
- Mas'uuliyad/xisaabtan.

Muuqaal 6.3

U sheeg ka qaybgalayaasha in qaab dhismeedka ururka CERT ee bixiyo:

- Eray bixinno la isla yaqaan oo wax ka geysta war-is-gaarsin iyo faham la wadaago.
- Wada xiriir wanaagsan oo ka dhexeeya xubnaha kooxda.
- Qaab maarayneed ee si wanaagsan u qeexan (tus., hoggaamin, aagagga hawleed, silsiladda xogwarranka, u wada shaqaynta kooxnimo).
- Mas'uuliyad/xisaabtan.

Ku dar in ururka (abaabulan ee) CERT uu fuliyo baahiyahaas, uuna leeyahay faa'iidooyinka ah:

- Eray bixin caam ah oo wax ka tarta xiriir waxgal ah iyo faham la wadaago.



URURKA CERT (WELI SOCDA)

Si kooban wax uga sheeg eraybixinnada muhimka ah ee ay CERT isticmaasho (sida., daahsan, degdeg ah, dhintay; khafiif, dhexdhexaad, iyo burbur culus, iwm.)

- Qorshe hawlqabad oo awoodaysan oo agaasima yoolalka tabeed, sida wax loo wajahayo iyo hawlaha lagu taageerayo gurmada.
- Maarayn ballaaran oo khayraadka la maareeyo oo sahlaya in khayraadka la hayo la isticmaalo waqti iyo si ku habboon.
- Maamul la xakamayn karo oo ballaaran oo qoondo iyo isku aaddin habboon sameeya oo uu markaa halkii maamuleba dusha ka eegayo inta u dhexaysa saddex iyo toddoba samatabbixiye.

HIMILOOYINKA URURKA CERT



MUUQAAL 6.4

Himilooyinka Ururka CERT

- Aqoonsiga xajmiga dhibaata
- Go'aansiga tabta guud
- Dirida kooxaha iyo sahayda
- Diiwaaninta waxqabadyada iyo natiijooyinka

Muuqaal 6.4

U sheeg kooxda in marka lagu jiro xaaladda musiibo, uu Ururka CERT:

- Aqoonsado xajmiga dhibaata. (Waa maxay dhibaata?)
- Go'aansado tabta guud. (Maxaanu qaban karraa, sideena u qaban doonnaa?)
- Diro kooxaha iyo sahayda. (Iyamaa qabanaysaa waxaas?)
- Diiwaaniyo waxqabadyada iyo natiijooyinka.


URURKA CERT (WELI SOCDA)

Adkee oo aad u muujin uu qaab dhismeedka ururka CERT yahay mid is bed-beddeli kara, marka waana uu ballaaran karaa wuuna soo yaraan karaa, taasi oo ku xiran qiimaynta iyo muhiimad siinta socota ee uu go'aamiyo IC, iyo dadka iyo sahayda ama khayraadka la heli karo. Ballaarashadaa iyo soo yaraantaasi waxay wax ka tartaa nabdoonaanta samatabbixiyaha, u samaynta wanaagga ugu badan dadka ugu tiro badan, is mamulid la maarayka karo iyo mas'uuliyadaha xubnaha CERT.

HABKA AMARBIXINTA DHACDADA



MUUQAAL 6.5



U sheeg kooxda in Habka Amarbixinta Dhacdada (ICS) uu yahay habka ay isticmaalaan hay'adaha dabka iyo xoojinta sharciga si ay u maareeyaan xaaladaha gurmada ah markii lagu jiro. Markii ay CERTyadu u hawlbillaaabaan darsaashooda iyo goobtooda shaqo waxay ka mid noqdaan habkaas isaga ah. CERTyadu waxay la xiriiraan ICS:

- CERTyadu waa qayb ka mid ah ICS.
- CERTyada oo dhan, iyagoo sii maraya Taliyeyashooda Dhacdooyinka aya xogta u soo gudbiyaan sarkaalka ugu horreeya ee dabdemiska ama sharci-xoojinta oo jooga meeshaas waxaanay amarradooda ka qaataan qofkaas isaga ah inta looga sheegayo habkii talisku in uu is beddelay, ama laga nasinayo iyaga.

URURKA CERT (WELI SOCDA)

Sharax in habdhismaha asaasiga ahee ICS uu dejiyo qofka ugu hor yimaada meesha ay wax ka dheceen, oo markaa noqda Taliyaha Dhacdada. Marka ugu horraysa, Taliyaha Dhacdada wuxuu qaban karaa dhamaan boosaska hawleed ee ka muuqda uuqaalka, laakiin markii ay dhacdadu sii fiddo, wuxuu dad u magacaabi karaa:

- Taliyaha Qaybta Hawlgallada.
- Taliyaha Qaybta Saadka.
- Taliyaha Qaybta Qorshaynta.
- Taliyaha Qaybta Maamulka.

U dir ka qaybgalayaasha shaxda dhismaha urur ee cinwaankeedu yahay, *Shaxda Ururka CERT ee Habka Amarbixinta Hawleed*, eek u taal Buugga Ardayga.




PM, P. 6-3



PM, P. 6-3

Shaxda ICS ee Habka Amarbixinta Hawleed



IShaxda ICS ee Habka Amarbixinta Hawleed, oo muujinaysa taliyaha dhacdada oo ugu sarreeya iyo afar Taliye Qaybeed (oo ah., Hawlgallada, Saadka, Qorshaynta, iyo Maamulka) oo hoos imanaya Taliyaha Dhacdada.



MUUQAAL 6.6

URURKA CERT (WELI SOCDA)

Markii ay dhacdadu sii ballaarato, waxaa muhiim noqon karta in dad kale loo magacaabo hawlo hoose oo ka mid ah waxqabadka oo khaas ah, iyada oo kala dambayntiina la ilaalinayo.

QAAB-DHISMEEDKA CERT

Qaab-dhismeedka CERT

Qaab-dhismeeda Amarbixinta CERT

Muuqaal 6.6

U sharax kooxda in qodobbada soo socda ee qaab-dhismeedka CERT ay yihiin muhiim:

CERT kasta waa in ay dejiso qaab kala dambayn ah.

Hoggaamiyaha CERT—ama, eraybixinta ICS, Taliyaha Dhacdada—waxaa loo magacaabaa in uu hago hawlaha kooxda. Markii lagu jiro hawlaha mutaddawiciinyta ee CERT iyo tababbarradaba, qofkani waa la magacaabi karaa. Hase yeeshee, marka loo hawlgalayo musiibo, qofkani waa midka ugu soo hormara barta hawlgalka oo horey loo sii cayimay.

Meesha uu hoggaamiyaha CERT ka dhigo barta taliska iyo la socodka ee dhacdada waxaa la yiraahdaa Barta Talada ee CERT. IC gu wuxuu joogaa talada. Haddii ay noqoto in uu IC gu baxo, masuuliyadda IC waa in lagu wareejiyo qof jooga barta talada.

Hoggaamiyaha CERT dad ayuu u magacaaban karaa in ay ka caawiyaan maaraynta sahayda, adeegyada, iyo saadka (saadka guud). Hoggaannada CERT waxa kale oo ay magacabi karaan xubno ururiya oo muujiya xogta (qorshaynta/akhbaaraadka) oo ururiya oo isku duwa dukumiinti. Si loo joogteeyo baaxadda talada, xilsaarkani wuxuu dhacaa markii uu ururku ballaarto.

URURKA CERT (WELI SOCDA)

- CERT waxay u shaqan kartaa sidii koox mid ah oo u qabata dhamaan hawlaha sidii loogu baahdo, waxaana haddii la doono look ala qaybin karaa kooxo yaryar (oo hawlgallada hoos yimaada) oo ugu yaraan saddex-saddex qof ah oo gaara dano uu IC gu gaar ugu qorsheeyey (tus. Dab xakamaynta, dawada, goobidda iyo samatabbixinta), kooxahaas oo mid waliba uu hoggaamiye leeyahay.
- Xaalad kasta oo lagu jiro, unug kasta oo la sameeyo waa in uu leeyahay hoggaamiye la yaqaan oo maamula waajibaadka la gudanayo oo ay ka amar qaataan xubnaha kooxda, oo markaa xogta u soo gudbinaysa hoggaankeeda loo cayimay.

Adkee in shaqaalaha CERT ay tahay in mar kastaa lagu daro koox ka kooban ugu yaraan saddex qof:

- Hal qof wuxuu ahaanayaa u dhexeeyaha la xiriira Barta Talada.
- Laba qofna waxay noqonayan “koox isu wehel” ah si ay wax uga qabtaan baahiyaha taagan.


U dir ka qaybgalayaasha shaxanka cinwaankiisu yahay *Qaabdhismeedka Hawgallada CERT ee la Ballaarshay* ee ku yaal Buugga Ardayga.

Tilmaan in qaybaha Saadka iyo Qorshaynta loo ballaarin sida:

- Saadka oo ay ku jiraan unugyada Taageerada iyo Adeegga.
- Qorshaynta oo ay ku jiraan unugyada Xaaladda iyo Meesha ay wax marayaan.



PM, P. 6-5



Qaabdhismeedka Qaybaha Hawlgalka ee CERT

Qaabdhismeedka Qaybaha Hawlgalka ee CERT oo muujinaya Taliyaha Qaybta Hawgallada oo ugu sarreya iyo saddex hoggaamiye kooxood oo ka hoosaysa (Dabdeminta, Goobidda iyo Samatabbixinta, iyo Caafimaadka). Dhamaan kooxaha Dabdeminta iyo Aagga Hawl-billawgu waxay ka amar qaadanayaan Hoggaamiyaha Kooxda Dabdeminta. Hoggaamiyaha Kooxda Goobidda iyo Samatabbixintana waxaa ka amar qaadanaya dhamaan kooxaha goobidda iyo samatabbixinta. Hoggaamiyaha Kooxda Caafimaadkana waxaa ka amar qaadanaya Kooxda Qaymaynta, Kooxda Daweynta, iyo Kooxda Rabrabta.



WEYDII SU'AAL

Weydii ka qaybgalayaasha haddii ay cidii qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan qaabdhismeedka CERT ama ICS.

Kooxda u sheeg in mawduuca kan xiga uu yahay go'aan-gaarista CERT. Sharax in xogta qar ka mid ahi ay noqon doonto muraajico ku saabsan waxyaabihii looga soo hadlay Cutub 5: Hawlgallada Goobidda iyo Samatabbixinta Khafiifka ah.



XUSUUSINTA MACALLINKA

ABAABULKA CERT

Qeexitaanka hoose wuxuu faahfaahin ka bixinayaa diridda CERT iyadoo ku salaysan ra'yiga ka jawaabidda musiibada. Umad waliba waxay u baahan tahay in ay samaysato hannaankeeda u gaarka ah oo ay CERT u hawlgasho

Soo bandhig adigoo ururka CERT ku sharxaya in uu hawl u qabsado dariiqada soo socota markii ay wax dhacaan ka dib:

- Dhacdada ka gadaal, xubnaha CERT ayaa daryeela naftooda, qoysaskooda, guryahooda, iyo derisyadooda.
- Haddii uu SOP waco is-hawlgelinta, xubnaha CERT ayaa sii aada meesha lagu diyaargarobo oo horay loo sii cayimay iyadoo markaa wata sahaydooda musiibada. Intay sii socdaan waxay sameeyaan qiimayn burburka ah, taas oo muhiim u noqon doonta go'aan qaadashada CERT IC.
- Xubinta CERT ee ugu horraysa imaashada aagga diyaar garowga ayaa noqda IC gii wax ka qabashada. Markii ay xubno kale oo CERT ahi yimaadaan, ICga CERT wuxuu talada ku wareejin karaa qof ka aqoon iyo xirfad badan. Haddii kale ICga CERT ayaa horunmariya abaabulka si loo xaqiijiyo isgaarsiin waxtar ah, in aan la lumen kala damabayntii, masuuliyadda in la joogteeyo, oo markaa wanaagga ugu badan loo sameeyo dadka ugu badan iyadoo aan xubnaha CERT halis la gelinayn.
- Markii akhbaaraadka la ururiyo oo la qiimeeyo (oo ay keenaan xubnaha CERT oo u soo warramaya aagga diyaargarowga, mutaddawiciinta gurmada, iyo xogaha ka yimaada kooxaha shaqeeya [sida goobidda iyo samatabbixinta] oo qaybta qorshaynta ah, markaa ayuu IC

gu muhiimadaha hawlqabashada mudnaan kala siinayaa oo uuna la shaqaynayaa Taliyeyaasha ama hoggaamiyeyaasha Qaybaha) Ururka CERT waa mid debacsan oo sii kora markii xog badan la helaba.

Dhacdo ka gadaal, xogta — iyo markaa muhiimadda—waxay isu sii bedeli karaan si degdeg ah. Xiriirka ka dhexeeya IC iyo kooxaha waxqabadka ayaa xaqiijiya in CERTyadu aanay antara-dhaafinin khayraadkooda iyo sahaydooda.

GO'AAN GAARISTA CERT (WELI SOCOTA)



**SOO BANDHIG
NABDOONANTA**

NABDOONAANTA SAMATABBIXIYAHA

Soo bandhig nabdoonaanta samatabbixiyaha adigoo kooxda u sharxahaya in maaraynta waxgalka ah ee meel ay musiibo ka dhacday ay u baahan tahay samaynta iyo isla socodsiinta yoolal tabeed iyo himilooyin ku salaysan inta badan nabdoonaanta shaqaalaha samatabbixinta.

Xusuusi kooxda in nabdoonaanta samatabbixiyaha ayaa aad muhiim u ah. Su'aasha ah "Ma u nabdoon tahay xubnaha CERT si ay isugu dayaan samatabbixin" waa asaasi.



MUUQAAL 6.7

Go'aan Gaarista CERT

- Burbur culus = Ha u bixin
- Burbur dhexdhexaad ah = Yaree samatabbixiyayaasha iyo waqtigay dhismaha ku jirayaanba
- Burbur khafiif ah = Meel ku ogow, qaymee, oo muhiimado kala sii u qaadidda dhibbanayaasha

Muuqaal 6.7

Adkee in jawaabta su'aashani ay inta badan ku xiran tahay xaddiga burburka gaaray dhismaha:

- Hadii uu burburku culus yahay, maahan in waxqabasho laysku dayo. Sharootada bilayska ku dheji meesha kuna qor in uu burburku culus yahay. Xubnaha CERT awood sharci uma laha in ay qof meel geli raba ka celiyaan. Markay ugu fiicnaadaan xubnaha CERT dadkay halista uga digi karaan
- Hadii uu burburku yahay dhexdhexaad, hel, kala sooc (sida., dhamaan kuwa dhib degdeg ah qaba waxay heli wax ka qabaso neefmareenka ah, xakamayn dhiigbaxa, iyo ka daweyn shoog) adigoo markiiba dhibbanayaasha u saaraya meel nabdoon yaraynaya tirada samatabbixiyayaasha dhismaha ku jira iyo waqtiga ay gudaha ku jirayaanba.



PM, P. 6-7

CERT DECISIONMAKING (CONTINUED)

Hadduu burburku yahay khafiif, Meel ku ogow, qaymee, oo muhiimado kala sii u qaadidda dhibbanayaasha meesha daweynta ee loo qoondeeyey.

U dir ka qaybgalayaasha shaxda cinwaankeedu yahay, *Dedaallada Samatabbixinta CERT oo ku Salaysan Xaddiga Burburka* oo ku yaal Buugga Ardayga meeshaas oo tabo gaar ah oo ku salaysan xaddiga burburka ay ku qoran yihiin. Dulmar tabaha shaxda ku qoran.

Kooxda u sharax in ballaarka ku lug lahaashada kooxo dhawr ah oo hawlwadeennada CERT ka mid ahi ay kala duwan tahay iyadoo loo eegayo xaddiga burburka meesha ka dhacay.



PM, P. 6-7

**Dedaallada Samatabbixinta CERT oo ku Salaysan Xaddiga
Burburka**

Xaddiga Burburka	Ma in Samatabbixin Laysku Dayaa?
Culus	Maya. Waa khatar in la galo. Dadka uga dig in aysan soo dhawaanin.
Dhexdhexaad ah	Haa, laakiin samee bixin degdeg ah oo nabdoon; eegidda dawada ha noqoto oo keliya hubin neefsiga, joojinta dhiig-baxa badan, iyo daweynta shoogga. Yaree tirada samatabbixiyeyaasha eek u jira dhismaha.
Khafiif	Haa. Meel ku ogow, qaymee, oo muhiimado kala sii u qaadidda dhibbanayaasha meesha daweynta ee loo qondeeyey.



PM, P. 6-8

GO'AAN GAARISTA CERT (WELI SOCDA)


U dir ka qaybgalayaasha shaxanka cinwaankiisu yahay,
TWaaajibaadka Kooxda oo ku Salaysan Heerka Burburka oo ku
yaal Buugga Ardayga.




PM, P. 6-8

Waajibaadka Kooxda oo ku Salaysan Heerka Burburka


Light Damage



Moderate Damage



Heavy Damage



Waajibaadka laga rabo kooxaha Dabdemiska, Goobidda iyo Samatabbixinta, Caafimaadka iyo aagga Daweynta oo ku salaysan xaddiga burbirka dhismaha ku dhacay.



WEYDII SU'AAL

GO'AAN GAARISTA CERT (WELI SOCDA)

Keen su'aalo "maxaad yeeli lahayd haddii..." ah oo u baahanaya in ay ka qaybgalayaashu aqoonsadaan tabaha samatabbixineed ee ku habboon xaalado burbur oo gaar ah. Tusaale ahaan, sharax nooca musiibo, nooca dhisme, iyo burburka la arko iyo kan suuroggalka ah. Weydii ka qaybgalayaasha in ay sheegaan waxa uu yahay hiigsigooda koowaad, waxay markaa samayn lahaayeen, iyo sababta.



QORO JAWAABAHA

XUSUUSINTA MACALLINKA

Ku qoro jawaabaha ka qaybgalayaasha xaashi shax ah wadahal koobanna ka yeesha waxay yiraahdeen.

Weydii ka qaybgalayaasha in uu qofna wax su'aalo ah ka qabo sida uu hiigsiga iyo tabaha CERT u saameeyo darraanta burburku.

U sheeg kooxda in mawduuca soo socda uu ku saabsan yahay dikumiintiga looga baahan yahay xubnaha CERT.



**SOO JEEDI
BAAHIDA
DIIWANGELINTA**

DIIWAAN GELINTA

Soo bandhig muhiimadda diiwaaninta adoo sheegaya in ay tahay muhiim in la diiwaangeliyo oo la sheego xogta ku saabsan xaaladda musiibada iyo sahayda la haysto. Carrabka ku xaji in xogta oo si hufan loo kala qato ay suuraggal ka dhigayso in sahayda loo geeyo si fiican iyo adeegga xirfadaysan ee gurmadda si wanaagsan loo dabbakho.



MUUQAAL 6.8

DIWWANIN (WELI SOCOTA)

Masuuliyadaha Diiwaaninta

- Sii barta taliska xogta soconaysa.
- Diiwaani xaladda dhacdooyinka:
 - Meelaha ay wax ka dheceen.
 - Marinnada galaangalka.
 - Khataraha la aqoonsaday.
 - Meelaha Taageerada.

Muuqaal 6.8

Sharax in ururka CERT, heer kasta oo awoodeed uu leeyahay mas'iiliyad diiwaan gelineed:

- Taliye Qaybyada ayaa mas'uul ka ah siinta Barta Taliska xog joogto ah oo ku saabsan qiimaynta burburka, xaaladda kooxda, iyo baahida markaa taagan.
- Barta Taliska ayaa mas'uul ka ah in ay diiwaangeliso sida ay xaaladdu tahay, oo ay ka mid tahay:
 - Meelaha ay wax ka dheceen.
 - Marinnada galaangalka.
 - Khataraha la aqoonsaday.
 - Meelaha Taageerada.

Ogsoonow in meelaha taageerada ay ka mid yihiin:

- Aagga diyaargarowga.
- Aagga daweynta iyo qaymaynta caafimaad.
- Rabrabta (Kobta Maydka) haddii ay dhimasho dhacday.

Dikumeentigaan waa in la siiyaa waxqabtayaasha xirfadleyda ah ee ugu horreeya oo meesha yimaada.

Xoog u muuji in xogtani waxay muhiim u tahay dabaggalka iyo ogaashaha xaaladda jirta oo dhan.



Soo BANDHIG
FOOMAMKA



PM, PP. 6-10
ILAA 6-16

DIIWAANINTA (WELI SOCOTA)

FOOMAMKA DIIWAAN GELINTA

Ku billow qaybtan in ay jiraan dhawr foom oo iska halbeeg guud ah oo loo isticmaali karo fududaynta diiwaangelinta iyo isa-siinta xogta. U dir ka qaybgalayaasha *Foomamka Diiwaangelinta* oo ku yaal Buugga Ardayga.

- Sahanka Qiimaynta Burburka Waxaa buuxiya hoggaamiyeyaasha CERT. Wuxuu koobaa khatarta guud ee aagag la xushay. Wuxuu muhim u yahay kala hor marinta iyo samaynta qorshe falgaleed.
- Foomka Khayraadka Shaqaale waxaa buuxiya Taliya Waaxyada waxaana loo isticmaalaa:
 - Ka warhaynta dadkii kooxda loo xilsaaray.
 - La socodka mas'uuliyad gudasha kooxda.
- Foomka Sahayda Qalabka Waxaa diyaariya shaqaalaha Saadka iyo Aagga Diyaarinta si ay ula socdaan qalabkii la deymiyey xubnaha CERT.
- Foomka Xog Kooban Ka Bixinta Dhacdada Wuxuu Taliyaha Dhacdada ku caawiyaa in uu aqoonsado burburka, halista la yaqaan, iyo tallaabooyinka la qaaday.
- Foomka Farriinta Waxaa loo isticmaalaa in ay farriimaha isugu diraan noocyada taliska ee kala sarreeya. (Adkee in ay farriimuhu noqdaan kuwo qeexan.)
- Diiwaanka Xaaladda Dhacdada Waxaa la socodka joogtada ah ee xaaladda u isticmaala barta taliska. Waxaana ku jira xog muhiim u ah la socodka waajibaadyada loo diray shaqaalaha.
- Khariidadda kobta iyo qorshayaasha dhismaha waxaa loo isticmaalaa in si aragti ah loola socdo hawlaha waxqabasho. Isgoysmo balaastiig ah ayaa mid suuroggal ah ka dhiga in xogta si isxigxigta loo joogteeyo.
- Diiwaanka Aagga Daweynta Dhibbaneyaasha waxaa loo isticmaalaa ion lagu qoro qof kasta oo la keenay aagga daweynta, xaaladdiisa guud (D, I, ama Dhimasho), iyo meesha uu/ay joogo/to.



PM, P. 6-10

Qiimaynta Burburka

Taariikh: 10/20/01	Qofka Sheegaya: Joe Montana	Page #: 1
Waqtiga la keenay: 9:50	Qofka loo sheegay: Jim Harkins	

Waqti	Meel/Cinwaan	Dab	Halisyo	Dhismeyaal	Dad	Jidad	/X
9:45	13267 Magnolia		X X	M			X

QOF WALIBA WUU ISTICMAALI KARAA

www.cert-la.com

10/08/01

Halistii aagga oo kooban – buuxi foomkan markaad u socotid Barta Taliska oo u dhiib Taliyaha Dhacdada.
 (* burburka dhismaha: h=culus, m=dhexdhexaad, l=khafif ah)
 Taliye Dhacdo: Dooro dhacdo, xarriiq dadban saar santuuqa Hawl Dhamaatay, ku koobiyee cinwaanka/meesha qaybta magaca dhacdada oo ku taal Soo koobidda Dhacdada, o sii dhacdada oo kooban iyo xaaladda hawsha hoggaamiyaha kooxda dhacdada. Ku koobiyee cinwaanka/meesha Xaaladda Dhacdo Dabadeed oo qor waqtiga billowga. Marka ay dhacdadu dhamaato, istallaab jdihg xarriiqii dadbanaa e ku yaallay santuuqa hawl dhamaatay, waqtiga ay dhacdadu dhamaatayna ku qor foomka Xaaladda Dhacdo Dabadeed.

KOOXDA KAJAWAABIDDA XAALADDA DEGDEGGA AH EE BULSHADA

CUTUB 6 URURKA CERT



PM, P. 6-11

Khayraadka Shaqaalaha

Taariikh: 10/20/01		Qofka Sheegaya: Mary Smith				Page #: 1		
Daabac Magaca iyo Waqtiga aad Gashay			Takhasuska Xirfadda Ka Dhig 1-5 ama Daabac "Maya"					
Magac	Waqtiga Gelidda	Waqtiga Hawsha	Dab	Caafimaad	S&R	Gaadiid	Diiwaan Gelin	Wax Kale
Mary Smith	9:15	9:15						Maareeyaha Shaqaalaha iyo Qalabka.
Jim Harkins	9:15	9:15						Taliyaha Dhacdada
Jerry Rice	9:32	10:05	X	X	no	3	maya	
Frank Thomas	9:35	10:00	2	3	X	4	maya	
J.J. Stokes	9:43	10:05	X	X	4	3	maya	raadiyo
Babe Ruth	9:45	10:00	3	2	X	4	5	
Steve Young	9:50	10:00	X	X	3	4	5	
Mark McGwire	9:50	10:00	1	no	X	3	maya	
Willie Mays	9:50	10:00	2	3	X	4	5	
Joe Montana	9:52	10:05	X	X	4	5	3	
Lou Gehrig	9:55	10:00	1	no	X	3	maya	
Serena Williams	9:58	10:03	1	2	3	no	X	Qalab culus
Sammy Sosa	10:03	10:03	3	2	1	5	4	U socda aagga daweynta
Leah Malot	10:11		2	3	1	4	5	Gaariga wax qaybinaya
Gete Wami	10:19		1	3	2	5	4	
Jerry Rice	12:00		2	1	4	3	maya	raadiyo

WAXA ISTICMAALA SAADKA IYO DIYAAR GAROWGA www.cert-la.com

10/08/01

Dadku ha sixiixeen oo ha calaamadeeyeen xirfaddooda gaarka ah. Markaad qof koox u xilsaarto, koobaab magaca kooxda oo ku xigta magaciisa iyo waqiga aad xilsartayba. Markii uu qof ka soo laabto hawl, xarriiq dul mari magaca qofka iyo sanduuqyada ku aaddan oo dhan, hana sixiixo qofku mar kale. Xusuusnow dhererka waqtiga uu qofku hawsha ku jiro iyo ciddii aan weliba a xilsaarin.



Taariikh: 10/20/01

Qofka soo sheegaya: Mary Smith

Page #: 1

Waqti:	La deynshay:	Dab Bakhtiye	Kiyaawe	Toosh	Guntinta Gargaarka Degdegga ah	Busteyaal	Bareelleyaal				
9:15		+4	+6	+7	+2	+1	2				
10:05	Willie Mays			-2							
10:05	Frank Thomas		-1	-2							
10:06	Joe Montana	-2		-1	-1	-2	-1				
10:10	Haraa	2	5	2	1	8					
10:55	Uu keenay Joe Montana	+2		+1	+1		+1				
11:00	Haraa	4	5	3	2	8	1				

WAXAA ISTICMAALAYA SAADKA IYO DIYAARINTA OO QURA www.cert-la.com

10/08/01

Qor qalabka iyo sahaydu gelidda iyo bixiddaba. Wadartooda qor mar-mar. Haddii shay eber ah la soo cesho (tusaale ahaan, dab bakhtiye), dib ugu dar oo koobaab tirada, si aadan hadhow wadarta ugu darin.

KOOXDA KAJAWAABIDDA XAALADDA DEGDEGGA AH EE BULSHADA

CUTUB 6 URURKA CERT



PM, P. 6-13

Ka Warbixinta Kooban ee Xaaladda


Waxa diyariley: Jim Harkins

Taariikh:
10/20/01

Waqti: 9:50

Magaca Dhacdada: 13267 Magnolia

Khariidad Raf ah:



Ururka Haatan:

Taliyaha Dhacdada: Jim Harkins

Batalyanka: 8

Falalka Socda oo Kooban

Ka taxaddar halista! Wadajir u shaqeeya!

Gaaska biyaha iyo korantada waa la xiray.

Waxaa la helay oo la baxshey 6 dhibbane.
1 baa gudaha ku dhintay.

Waxaa la daweyey 1 sahlan, 3 la daahin karo iyo 2 degdeg ah.

Waxaa aagga daweynta loo qaaday 6 dhibbane,
Dabadeed 3 dhibbane ayaa loo sii qaday Cisbitaalka Kaiser


WAXAA LOOGU TALAGGALAY TALIYAHA DHACDADA

www.cert-la.com

10/08/01

Taliska Dhacdada: Dhacdada ka soo xawil xaashida Qiimaynta Burburka. Sawir khariiddadda aagga dhacdada iyo, haddii la yaqaan wixii halis ah. Qor magaca Taliyaha Dhacdada iyo tirsiga batalyanka ee ururka hawsha wada. Sii hoggaamiyaha dhacdada xaashida Xaaladda Waajibaadka.

Hoggaamiyaha kooxda dhacdada: Sawir khariidad ay ku muujisan yihin wixii halis ah, haddii aysan horay u samayn Taliska Dhacdadu. Soo koob falalka kooxaahaaga. Marka ay dhacdadu dhamaato, Taliska Dhacdada ku soo celi foomkan oo uu la socdo Xaaladda Waajibaadka.

	PM, P. 6-14	Foomka Farriinta
Ku: Saadka	Xarunta Farriinta oo Keliya Dhacdada: <u>13267 Magnolia</u> Waqti: _____ Taariikh: <u>10/20/01</u> <input type="checkbox"/> imanaya <input type="checkbox"/> tegaya	
Ka: S&R 1		
Waqti: 10:40		
Qoraalkii Farriinta:		
Hal qof oo xanniban ayaa la helay.		
Waxaannu rabnaa 2 kal-bireed iyo weelayn ku filan l2 taageero, oo uu mid waliba jooggisu yahay laba fiit		
Falka la Sameeyey:		
Waxaa yaraanaya weelaynta.		
Waxaandirayaa 2 kal-bireed iyo weelayn 18" ah, kuwo kalena waa soo iibsanayaa		


ISTICMAAL FAR FASIIX AH

www.cert-la.com 10/08/01

Tusaalooyin: Waajibaadkii waa dhamaaday, sahay dheeraad ahaa loo baahan yahay, waa la dhamayn kari la' yahay, la socodsiinta xog/xaalad khaas ah.

KOOXDA KAJAWAABIDDA XAALADDA DEGDEGGA AH EE BULSHADA

CUTUB 6 URURKA CERT

	PM, P. 6-15	Xaaladda Dhacdada		
Taariikh:	Qofka soo Sheegaya:		Page:	
Cinwaan/Meel	Waajibaad	Waqti Bilow	Waqti Dhamaad	
8203 Sepulveda	Mary Smith	9:15	10:25	
8203 Sepulveda	Jim Harkins	9:15	10:25	
7212 Sepulveda	Frank Thomas	10:00		
7212 Sepulveda	Babe Ruth	10:00		
7212 Sepulveda	Steve Young	10:00		

LOGGU TALAGGALAY TALISKA DHACDADA www.cert-la.com

10/08/01

Ka guuri waajibaadyada dhacdada waraaqaha Qiimaynta Burburka. Markii uu waajibaadku dhamaado, qor waqtiga dhamaadka oo istillaab ku samee dhacdadaa ku qoran Qiimaynta Burburka.



Date: 10/20/01		Person Reporting: Rich Richins			Page #:	
Time In:	Name or Descriptio	Triage Tag	Condition	Moved To:	Time Out	
10:19	Rich Richins	D	Minor cut on forehead			
10:35	White male, about 45 years, balding, overweight	I	Deep cut on right thigh, unconscious, shock			
10:52	Willard Scott	D	Broken left arm, swollen left ankle	Kaiser	12:08	
11:15	White female, blond, late 20's, pregnant	I	Unconscious, shallow breathing, shock	Kaiser	12:08	
11:20	White female, 60s, "Annie"	I	Disoriented, large bump on forehead, shock	Kaiser	12:08	
11:47	Jill Johns	D	Minor cuts and bruises, shock			

10/08/01

www.certla.com

FOR MEDICAL TREATMENT AREA

Document each person brought to the treatment area.
 If Victim Cannot Give Name, Write a Brief Description (e.g., Sex, Approximate Age, Hair Color, Race, etc).
 Tag color: red=immediate, yellow=Delayed, green=Minor, Black=Dead



XUSUUSINTA
MACALLINKA



PM, LIFAAQA 6-
A



PM, P. 6-17

DIIWAANINTA (WELI SOCOTA)

Si kooban u dulmar mid kasta oo ka mid ag foomamkaas oo qeex noocyada xogeed ee ay tahay in mid waliba ay tahay in uu ku jiro.

U sheeg ka qaybgalayaasha in foomamkaan oo xajmi buuxa ah ay ku yaalliin dhamaadka Cutub 6 ee Buugga Ardayga. Sgarax in kuwaasi ay nuqullo ka samaysan karaan ka qaybgalayaasha markay baranayaan hawshan iyo markii ay dhacdo musiibo oo run ahi dhacdaba.

U dir ka qaybgalayaasha shaxda la yiraahdo *Foomamka loo Isticmaalo Diiwaan Gelinta Waxqabadka* ee ku taal Buugga Ardayga, hadday tusaale rabaan.



Foom	Ujeeddo
Sahanka Qiimaynta Burburka	<ul style="list-style-type: none">▪ Waxaa buuxiya hoggaamiyeyaasha CERT. Wuxuu koobaa khatarta guud ee aagag la xushay, oo ay ka mid yihiin:<ul style="list-style-type: none">• Dababka.• Khataraha yutiilitida.• Burburka gaaray dhisme.• Dhaawacyada iyo dhibabka.• Galaangalka la heli karo.▪ Wuxuu muhiim u yahay kala hor marinta iyo samaynta qorshe falgaleed.
Foomka Khayraadka Shaqaale	<ul style="list-style-type: none">▪ Waxaa buuxiya xubnaha CERT marka ay Aagga Diyaarinta yimaadaanba. Wuxuu xog ka bixiyaa:<ul style="list-style-type: none">• Yaa jooga goobta.• Goortay yimaadeen.• Marka la xilsaaray.• Xirfaddooda gaarka ah.▪ Shaqaalaha Diyaarinta u isticmaala in ay uga warhayaan shaqaalaha la heli karo.
Foomka Sahayda Qalabka	<ul style="list-style-type: none">▪ Waxaa diyaariya shaqaalaha Saadka iyo Aagga Diyaarinta si ay ula socdaan qalabkii la deymiyey xubnaha CERT.
Xog Kooban Ka Bixinta Dhacdada	<ul style="list-style-type: none">▪ Waxaa buuxiya Taliyaha Dhacdada (Hoggaamiyaha Kooxda) so uu u aqoonsado burburka, halista la yaqaan, iyo tallaabooyinka la qaaday.
Foomka Farriinta	<ul style="list-style-type: none">▪ Waxaa loo isticmaalaa in ay farriimaha isugu diraan noocyada taliska ee kala sarreeya. Farriimuhu waa in ay noqdaan kuwo qeexan, wana in ay ku aaddan yihiin qaddiyadaha muhiimka ah sida:<ul style="list-style-type: none">• Dhamaynta Waajibaadka.• Sahay hor leh oo loo baahan yahay.• Xog gooni ah.• Warbixinta ugu dambaysa ee xaaladda.
Diiwaanka Aagga Daweynta Dhibbaneyaasha	<ul style="list-style-type: none">▪ Waxaa buuxiya shaqaalaha Aagga Daweynta si ay u qoraan dhibbaneyaasha soo gelaya aagga daweynta, sida ay yihiin, iyo xaaladda ay ku jiraan.
Diiwaanka Xaaladda Dhacdada	<ul style="list-style-type: none">▪ Waxaa la socodka joogtada ah ee xaaladda u isticmaala barta taliska. Waxaana ku jira xog muhiim u ah la socodka waajibaadyada loo diray shaqaalaha.



XUSUUSINTA
MACALLINKA

DIIWAANINTA (WELI SOCOTA)

Foomam kale oo muunado ah ayaa laga heli karaa mareegta (web site) CERT:
[http: training.fema.gov/emiweb/cert/](http://training.fema.gov/emiweb/cert/). Waad yeeli kartaa in aad foomamkaan qaadatid hadday muhiim tahay oo ay daboolayaan baahida bulshadaada.

Weydii in uu qofna qabo su'aalo ku saabsan shuruudaha diiwaaninta ee CERT.



HAWL QABO

HAWL: WAXQABADKA ICS

Ujeedo: Hawshani waxay ka qaybgalayaasha siinaysaa fursad ay ku ogaadaan hawlaha ICS markii la galo xaalado gaar ah.

Tilmaamo: Si aad hawshan u qabato, dhamee tallaabooyinka soo socda:

1. U kala xilsaar ka qaybgalayaasho kooxo yar yar oo kala miis ah.
2. Sharax in layligani uu kooxda siin doono fursad ay ku aqoonsadaan hawwlahan taxani meesha hawlqabadka ICS ay ka hoos imaanayaan.
3. Kooxda u sheeg in ay dib u aqriyaan liiska hawlaha ayna isticmaalaan soo gaabinnada, "IC," "O," "P/I," ama "L" si ay u muujiyaan hawsha ICS ee dabooli doonta hawshan.
4. Markay kooxuhu dhameeyaan, af hayeen su'aalaha fasalka ha ka siiyo jawaabta ay isla heshay koox kasta.

**Tilmaamo:**

Adigoo isticmaalaya aqoonta aad u leedahay shanta hawlqabad ee ICS, go'aan ka gaar hawlqabadkee ayay hawlahaan soo socda soo hoos geli doonaan. Hawlaha qaar ayaa waxay noqonaysaa in hawlqabad hal ka badan ay ku lug yeeshaan si loo dhamaystiro.

Isticmaal furaha soo socda si aad meelaha bannaan ee hawlaha ka horreeya u buuxisid:

IC = Taliyaha Dhacdada

O = Hawlgallada

P = Qorshaynta

L = Saadka

- L 1. Waa mugdi, nalalkoo dhanna waa densan yihiin, waxaad u baahanaysaa tooshash dheeraad ah si aad u sii wadato waxka-qabadka hawshaa.
- L 2. Meeshii markii hore loo qoondeeyey gargaarka degdegga ah ayaa fiiladeedii korantadu duntay.
- O 3. Qof deris ahaa soo sheegay in uu gurigiisa gaas ka urayo, laakiin gaaska kama uu xiri karo meesha mitirka.
- L 4. Batarigii raadiyaha gacanta lagu qaado ayaa dhintay oon shaqaynayn.
- P & I 5. Magaalada ayaa rabta in ay ogaato xaaladda guud ee darsaashaada.
- O 6. Dhawr ka mid ah dadka deriskaga ah ayaa dhaawacyo khafiif ah oo gurmada degdeg ah u baahan qaba.
- P 7. Dab ka soo hulaaqaya dersaal kale ayaa deriskaaga u soo socda.
- O 8. Eey nooca *pit bull* ah oo wareegaya saldhigga gargaarka koowaad ayaa la arkay.
- IC 9. Koox warlalis ah ayaa kaamiro ula timid in ay ku duubaan hawsha aad waddaan.
- P & O 10. Labo deris oo baydadsan ayaa codsanaysa kaalmo. Mid baan heli karayn cunuggeedii ttallaabo baradka ahaa oo banaanka ku cayaarayey markii uu mugdigu qam yiri. Kan kale wuxuu rabaa in xaaskiisa laga dulqaado bug kays ku dul dhacay. Wuxuu sheegayaa in ay ka dhiig baxayso nabar madaxa uga yaal.
- L 11. Roob baa curanaya. Bartaada talis iyo aagga gurmada koowaadba gabbaad roobka cessa ma laha.
- P 12. Dad aad u tiro badan ayaa u imanaya Taliyaha Dhacdada si ay su'aalo u weydiyaan. IC ga ayaa qof raba in uu u noqdo "albaab dhawre."
- O 13. Waxaa xaafaddaada ku soo kordhaya baabuur iyo dad lug ah oo aad u tiro badan, maxaa wacay jidadka kale ayaa xiran.
- P 14. Taliyaha Dhacdada ayaa aad u daallan oo doonaya in uu cid kale ku wareejiyo mas'uuliyadda. Waxay doonaysaa in ay ka xog bixiso halka ay xaaladi marayso wareejinta ka hor.
- L/O 15. Dad badan oo xaafadda deggan ayaa u yimid in ay mutaddawcnimo ku shaqeeyaan.
- IC 16. Xog ayaa timid dumid iyo dhaawac ku sheegaysa baloogga xiga. Kooxo xaaladda soo qiimeeyo in loo diro ayay u bahan tahay.
- IC 17. Waxqabte xirfadle ah ayaa meesha yimid, wuxuuna rabaa in xaaladda meeshay marayso loo soo koobo.

DIIWAANIN (WELI SOCOTA)

Kooxda u sheeg in inta ka hartay cutubkani uu ka kooban yahay layli miis dushiis ah. Layligani wuxuu siin doonaa ka qaybgalayaashu in ay dabbakhaan inta badan aqoontii ay koorsadan ka heleen ayna u isticmaalaan markay musiibo run ahi dhacdo.

Soo bandhig “Xeerarka Hawlgalka.” Carrabka ku adkee in loo baahan yahay raacidda amarrada, xiriiridda, iyo samaynta go’aano nabdoon.



XUSUUSINTA
MACALLINKA

Si aad u samayso layli-miiseedka soo socda dooro xaalad bulshadaada ka dhex dhici kara oo markaa CERT meesha loo diri karo. Xulo oo meesha ku dar khataraha ay xubnahaaga CERT kala kulmi karaan dhacdada.

Qayb ka mid ah layligaaga ahaan, waxaad u baahan kartaa in aad taxdo lays xaaladaha bulshadaada ka dhici karo ah dabadeedna weydiiso ka qaybgalayaasha in ay jawaabahooda kala muhiimado siistaan iyagoo ku salaynaya samaynta wanaagga ugu badan loo sameeyo dadka ugu badan.



SAMEE LAYLI

LAYLI MIISKA DUSHIISA

Ujeedo: Layligani waa mid wadaqabad u baahan oo miiska dushisa lagu samaynayo oo fursad kuu siinaysa in aad dabbakhdo wixii aad ka soo baratay abaabullaanta kooxda.

Tilmaamo: Si aad u dhamaystirto layligan, dhamaystir tallaabooyinka soo socda:

1. Ka dhig ka qaybgalayaasha kooxo miiseedyo yar yar.
2. U qaybi *Layliga CERT ee Miiska Dushiisa* ee aad diyaarisay, markaana sharax himilooyinka layliga.



BIXI XAASHIYO
6.1

LAYLI MIISKA DUSHIISA (WELI SOCDA)

3. Sharax in layligani uu kooxda siin doono khibrad go'aan gaarista ah.

Xusuusi kooxda in himilooyinka CERT ay yihiin in ay:

- Aqoonsadaan weynaanta dhacdada.
 - Go'aansadaan tab guud oo CERT.
 - Muhiimado in la samaysto, sahayna la geeyo.
4. Dib u eeg doorarka ka qaybgalayaasha ee layligana una sheeg in ay haystaan 30 daqiqo oo ay ku dhameeyaan layliga.
 5. Dhamaadka layliga koox weyn u wada fariisi ka qaybgalayaasha oo ka wada hadla natiijooyinka layliga, kana jawaab wixii su'aalo ah oo ay ka qaybgalayaashu qabi karaan.



**Soo Koob
Qodobbada
Muhimka ah**

GEBAGGABADA CUTUBKA

Soo gebaggabee qodobbada muhimka ah ee cutubkan:

- Ra'yiga ICS waa wax lagu tijaabiyey xaalad gurmada musiiibo ah. ICS waxay bixisaa qaab debecsan oo lagu xakameeyo shaqaalaha, dhismayaasha, qalabka, iyo war is gaarsiinta oo loo ballaarin karo sidii loo baahdo. Mabaaddii' deeda ayaa sal looga dhigaa ururka CERT..
- Su'aasha muhiimka ah oo ay tahay in ay hoggaamiyeyaasha CERT is weydiyaan waxa ay tahay: "Miyay u nabdoon tahay si ay xubnagha CERT isugu deyi karaan samatabbixin?" Haddii iyo haddii aan laysku dayeyn samatabbixin waxay ku xiran tahay xaddiga burbur ee gaaray dhismahaa.
- Waa muhiim in la diiwaangeliyo oo loo sii sheego xogta u saabsan xaaladda iyo meesha ay samatabbixintu marayso dhamaan heerarka kala duwan ee CERT.
 - Kooxaha jawaabta iyo kooxaha ay ka dhex faltamaan waa in ay barta taliska siiyaan xog joogto ah oo ku saabsan qiimaynta burburka, xaaladda kooxda, iyo baahiyaha markaa taagan.
 - Barta taliskuna waa in ay diiwaan gelisaa meesha ay xaaladdu marayso si markaa guud ahaanba xaaladda musiiibada isha loogu hayn karo.



**XUSUUSINTA
MACALLINKA**

Weydii ka qaybgalayaasha in ay cidu qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan waxyaabihii uu ka hadlayey cutubkani.

Sharax in cutubka kan xigaa uu ka warrami doono cilmu-nafsiyada musiiibada sida uu ula xiriiro CERTyada.